



## Waa maxay rabshada gurigu?

Rabshada guriga waa dabecad cey ah oo xun oo uu sameynayo hal qof si uu u kontaroolo iyo inuu dusha ka qabsado qof kale oo ay xiriir dhaw wadaagaan. Waxaa ku jira nooc kasta oo ka mid ah waxyeelo jireed, nafsadeed, bulshadeed, mid dhaqaale ama mid maskaxeed. Waxaa sidoo kale ku jira dabecadaha kugu dhalinaya inaad u baqdo ammaankaaga.

Waxaa ku jiri kara waxyaalaha sida:

- Feedhida, wax ku dhufashada, laadida, dhirbaaxida ama ceejinta.
- Isticmaalida hub sida middiyo si uu kuugu hanjabo
- Kugu khasbida inuu kuu galmoodo( kufsi)
- Kugu khasbida inaad fiiriso sawirada dad qaawan ama kuwo isu galmoonaya
- Kugu khasbida inaad u galmooto dad kale
- ceebeynta, ceyda ama magacyo ugu yeerida
- Kugu dhida waxaa tahay nacas, buuran ama fool xun
- Kuugu hanjabida inuu ku dilo
- Kuugu hanjabida inuu dalkaagii dib kuugu celiyo
- U hanjabida carruurtaada ama xubnaha kale ee qoyskaaga
- Burburinaya alaabta muhiimka kuu ah
- kugu yareynta lacagta
- Kaa horjoogsiga inaad shaqeyso ama inaad saaxiibadaa soo aragto iyo qoyskaaga
- Kugu xirida guriga
- Kugu eedeynaya inaad dhileysato
- Ku weydiisanaya waxyaalo aan macquul aheyn

Waxaa laga yaabaa inaad ula joogto saygaaga carruurtaada darteed, waxaa laga yaabaa inaad laheyn qoys ama saaxiibo ama waxaa laga yaabaa inaad ka xishooto inaad dhibaato dhaliso. Ma aha in lagugu eedeeyo rabshada guriga ma aha weligeed wax khaladkaaga ah.

**Keli ma tihid – waxaad la hadli kartaa qof fahmaya oo kuu helaya caawimaad. Waxa ugu fiican ee aad u sameyn karto carruurtaada iyo nafsadaadaba waxaa weeye inaad la hadasho qof oo aad caawimaad heshid.**

## Wac khadka Taleefanka ee Rabshada Guriga 1800 65 64 63

Haddii aad u baahan tahay inaad qof kala hadasho dhibaatooyinkaaga rabshada guriga, waxaad wici kartaa Khadka Taleefanka Rabshada Guriga 1800 65 64 63.

Khadka Taleefanka Rabshada Guriga wicitaankiisu waa bilaash, gobolka oo dhan adeega u gudbinta iyo la talinta dhibaataada taleefanka ee 24-ka saac. Khadka Taleefanka Rabshada Gurigu wuxuu sidoo kale kuu qaban karaa turjubaano. Wicitaan kasta oo la soo waco Khadka Taleefanka ee Rabshada Gurigu waa qarsoodi..

Waxaa jooga la taliyayaal dumar ah oo tababaran Khadka Taleefanka Rabshada Guriga oo kaa caawin kara inaad:

- Hesho meel ammaan ah
- Hesho hoy dedeg ah oo ku meel gaar ah adiga iyo carruurtaadu
- La hadasho boliiska oo hesho caawimaad sharciyeed
- Hesho daryeel isbitaal iyo adeegyada taageerada qoyska
- Hesho Amarka Rabshada Maxbuusida (AVC)
- Ka hesho adeeg goobta aad degan tahay si aad taageero u hesho

Qaabab badan oo ka mid rabshada gurigu waxay ka tahay dembi Australia Gudaheeda. Rabshada Gurigu waa dabecad aan la aqbali Karin. Uma baahnid inaad u adkeysato. Waxaa jira adeegyo badan oo ku caawin kara.

**Wac Khadka Taleefanka Rabshada Guriga 1800 65 64 63. haddii adiga ama carruurtaadu aad khatar dhaw ku jirtaan wac 000 si aad caawimo uga hesho.**

Dadka ka muuqda sawirada warqadan waxaa loo isticmaaley moodo ahaan oo keliya.

Warqadan waxaa laga heli karaa website ka DoCS [www.community.nsw.gov.au](http://www.community.nsw.gov.au) in: Carabi • Shiineys • Koro-oshiyaan • Daari • Faarsi • Kuuriyaan • Masadooniyaan • Ruush • Samoon • Soomaali • Isbaanish • Turki • Fiyatnaamiis

